



1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>



Orientation to Ontario

SOCDAALKA

AQOONSIGA DAGANAANSHAHA RASMIGA AH

Opportunities Ontario: Barnaamijka Magacaabaha Soo galootiga ee Ontario (OINP) ayaa u magacaaba shaqsiyaadka iyo qoysaskooda in la siiyo aqoonsiga deganaanshaha rasmiga ah ayadoo lagu salaynaayo shaqo qofku horey uga helay gobalka.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan Opportunities Ontario, wac [1-800-267-7329](tel:1-800-267-7329) ama booqo: ontario.ca ama findlink.at/ONT_PNP

Barnaamijka Opportunities Ontario wuxuu marinno kala duwan ku leeyahay nidaamka Fiisada Degdega ah:

Hanaaanka Shaqaalaha Shisheeye - Si loo buuxiyo shaqooyinka maamulka, xirfada ama ganacsiga xirfada leh, loo shaqeeye ayaa codsan kara in shaqaale loo ogolaado. Marka shaqada la ogolaado, shaqaalaha shisheeye ayaa buuxinaaya codsiga OINP.

Qaybta Shaqaalaha Xirfada leh - Dadka kasoo baxa kuleejyada iyo jaamacadaha Canada ayaa codsan kara labo sano gudahood kadi marka ay dhamaystaan barnaamijka labada sano ee kuleejka ee lagu bixiyo dhibloomada ama digriiga ama shahaadada heerka sare ah ee halka sano ah ee ay ka qaataan Ontario. Codsadeyaashu waa inay haystaan yabooha rasmiga ah ee shaqada buuxda ee jagada maamulka, xirfadlaha ama ganacsiga xirfada leh. Loo shaqeeyuhu waa inuu codsadaa inay shaqada ogolaato Opportunities Ontario.

Dadka ka qalin jebiya Ph.D. iyo Masters ka -

Dadka ka qalin jebiya Ph.D. iyo Masters ka ee jaamacad u qalanta oo ku taalla Ontario ayaa codsan kara ilaa labo sano kadib marka ay dhamaystaan barnaamijka. Looma baahna in qofku shaqo helo.

BARNAAMIYADA FEDERAALKA EE AQOONSIGA DEGANAANSHAHA RASMIGA AH

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada soo socda ee federaalka, booqo Laanta Soo galootiga, Qaxootiyaasha iyo Muwaadinimada ee Canada: canada.ca ama findlink.at/applyImmCa

Casharka Barashada Canada - Dadka haysta ugu yaraan 12 billood oo ay ka shaqaynayeen shaqo Canada ah oo hayay jagada maamulka, xirfadlaha ama ganacsiga xirfada leh.

Shaqaalaha Federaalka ee Xirfada leh - Dadka buuxiyaa shuruudaha u qalmida sida khibrada shaqada xirfada leh, waxbarashada, awooda luuqada haystana lacag ku filan oo ay ku taageeraan naftooda iyo qoyskooda ku dhaqan Canada.

Ganacsiyada Xirfada leh - Qaybtaan waxaa loogu talagalay dadka haysta ugu yaraan labo sano oo khibrada shaqada buuxda ah ee ganacsiga xirfada leh, haystana yabooha shaqo buuxda ama shahaadada Ontario ee aqoontooda ganacsiga.

Maalgashadeyaasha iyo Shaqo Abuureyaasha Dadka maalgashiga ugu yar ku sameeya ganacsi oo ka socda midkood koox maalgashi oo gaar ah ama sanduuq maalgashi oo ku yaala Canada.

Dadka Ganacsiga Leh - Qaybtaan waxaa

Funded by / Financé par :

loogu talagalay dadka doonaaya inay ganacsi ka furtaan Ontario kuwaasoo diirada saaraaya shaqooyinka dhaqanka, ciyaaraha ama maamulka beeraha.

Isboonsarka Qoyska - Dadka deganaanshaha rasmiga ah haysta ama muwaadiniinta Canada ayaa isboonsar u samayn kara qaar kamid ah xubnaha qoyska si ay ugusoo guuraan halkaan. Xubnaha qoyska ee u qalma waxaa kamid ah xaasaska, ilmaha, waalidiinta iyo waalidka waalidkood iyo qaraabo kale oo la cayimay. Isboonsaradu waa inay buuxiyaan shuruudaha dakhliga si ay u muujiyaan inay taageeri karaan qoyskooda.

Daryeeleyaasha La Nool Qofka - Shaqaalaha u qalma yaa codsan kara daryeelaha la nool carruurta, waayeelka ama shaqsiyaadka naafada ah. Daryeeleyaashu waa inay heshiis buuxa oo qoraal ah la galaan loo shaqeeyaha ku nool Canada. Kadib marka ay shaqeeyaan shaqo buuxda labo sano, daryeeleyaasha la nool qofka ayaa codsan kara aqoonsiga deganaanshaha rasmiga ah.

